

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-483/052011

DATE 10/04/2011

XEER MADAXWEYNE NO: 0133/052011

Dhaqan-galka Sharciga Gaarka Ah ee Adeega Madaarada JSL

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL,

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka JSL,

Markuu Helay: Go'aanka Ansixinta Sharciga Gaarka ah ee Adeega Madaarada JSL ee Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-14/512/2011 ee.

Wuxuu soo saaray


Dhaqan-galka Sharciga Gaarka ah ee Adeega Madaarada JSL oo lagu baahin doono faafinta rasmiga ah (Bulatino Officiale).

Allaa Mahad Leh,


Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



RL: 86
RECEIVED
14/05/2011





Ref: Gw/KF-14/512/2011

Date: 26/03/2011

GO'AAN ANSIXIN SHARCIGA GAARKA AH EE ADEEGA MADAARADA JSL..

GOLAHA WAKIILADA JSL:-

MARKUU ARKAY: Qodobka 54aad farqadiisa 1aad iyo, Farqadiisa 4aad ee Dastuurka Qaranka

MARKUU ARKAY: Digreeto Madaxwayne JSL /Lr. JSL/M/GW/08-408/03/2011 ee 20/03/2011

MARKUU DERSAY: Talo bixintii Guddiga dhaqaalaha iyo doodda mudanayaashu Miisaaniyada soo Jeediyeen in lacagta (khidmad laga qaado Muwaadiniinta Golaha la hor Keeno si loo jideeyo ama loo sharciyeeyo

MARKUU KU QANCAY: Go'aanka Golaha Wasiirada ee fadhigoodii 28aad ee 3/3/2011 ku ansixiyeen khidmada sadexda Dollar(\$3) ee Golaha soo hordhigtay Wasaarada Duulista Hawada iyo Gaadiidka Cirka

MARKUU DHAGAYSTAY: Doodda in la jideeyo iyo in aan la jidayn sharciga gaarka ah ee Adeega Madaarada

MARKUU U CODEEYAY: Ansixinta dakhliga gaarka ah ee adeega Madaarada iyadoo maamulka dakhliga gaaarka ah loo raacayo shuruucda iyo xisaabaadka maaliyada Somaliland iyo in aan laga qaadin lacagtan muwaadiniinta aan qaangaadhka ahayn, waxana goob joog ahaa 53 Mudane.

WUXUU ANSIXIYEY

Cod aqlabiyad ah oo dhan 33 Cod oo gacan taag ah ku ansixiyay khidmada sadexda Dollar (\$3) ee dakhliga gaarka ah ee adeegga Madaarada, halka ay ka diideen 11 Mudane, kana aamuseen 7 Mudane, Guddoomiyuhuna muu coddayn sida caadada ah.

Allaa Mahad Leh

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Jsl

Jamaal Jaamac Xasan

Ku-simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Jsl



REPUBLIC OF SOMALI LAND
MINISTRY OF CIVIL AVIATION & AIR TRANSPORT

Our Ref: _____
Your Ref: _____

KU: GOLAHA WAKIILADA JSL
=HARGEYSA=

Date: 02/03/2011.

Ujeeddo: Codsi Ansixin Dakhliga Gaarka ah ee Adeegga Madaarada.

Mudanayaal,

Waxaanu si xishmad & qadarin leh idiinla socodsiinaynaa in dhoofayaasha & soo degayaasha Madaarada Dalka ee shaqeyya laga qaado waqtigan xaadirka ah \$ 2 (laba Dollars), balse aannu doonayno in aannu ka dhigno \$ 3 (Saddex Dollars) ka dib markii ay is dabooli wayeen Dakhligii labada Doller & Baahidii adeegga Madaaradda. Dakhligan yari wuxuu udub-dhexaad u yahay hab-sami u socodka hawlaha & adeegga Madaarada, maadaama, ay Dawladda Dhexe kafaala qaadi wayday fulinta adeegyadan asaasiga ah. Taasoo aan haba yaraatee aan waxba loogu tala-gelin Miisaaniyad sannadeedka 2011-ka. Dakhliga naga soo gala 2da Doller ee hadda la qabto celcelis ahaan waxay dhan yihiin sidan:-

➤ Madaarka Caalamiga ah ee Cigaal	=	\$ 7.000 Per Month
➤ Madaarka Berbera	=	\$ 4.000 Per Month
Total:-		\$ 11.000

Sidaas darteed, si sharciyadeedda loo horgeeyo Golaha Wakiilada waxa aannu idinka codsanaynaa in naloo ansixiyo 3daas Doller si aannu ugu qabano hawlaha adeegga Madaarada ee faahfaahintooda kharash hoos ku xusan tahay.

- KHARASHYADA DHEERAADKA AH EE MADAARKA CAALAMIGA AH EE CIGAAL (HARGEYSA):-

1) Shidaalka Mishiinada Laydhka shaqeyya Habeen & Maalin		
40LtrsX31days X5,800	=	7,192,000/=
2) Shidaalka Buska qaada Shaqaalaha Madaarka		
10LtrsX 31daysX5,800	=	1,798,000/=
3) Shidaalka Dab-demisyada Saddex Baabuur		
3X10LtrsX31daysX5,800	=	5,394,000/=

4) **Biyaha Madaarka Hargeysa:-**

- a) Booyadda Madaarka ee Wakaaladda Biyaha ka soo qaadda maallintii $2 \text{ Load} \times 31 \text{ Days} \times 200,000 = 12,400,000/=$
b) Hal Load oo biyo dheeraad ah maalin dhaaf $16 \text{ Load} \times 410,000 = 6,560,000/=$

5) **Kharashvada dayactirka var-var & qalabka Nadaafadda**

Musqulaha:-

- a) Dayactirka yar-yar ee Musqulaha = 800,000/=
b) Nadaafadda Musqulaha = 1,500,000/=

6) Dayactirka Kab-kabka Runway-ga = 3,000,000/=

7) Dayactirka Dhismayaasha iwm = 1,000,000/=

8) **Direyska Shaqaalaha sannadkii hal mar**
 $75 \times 2 \text{ Joog} = 150 \text{ Joog} \times 127,600 = 19,140,000 \text{ Bishii} = 1,595,000/=$

9) **Over-Time-ka Shaqaalaha ee Joogtada ah:-**

- a) Shaqaalaha Xoola-celiyayaasha, Beer-walayaasha & Nadiifiyayaasha 10qof $\times 31 \text{ Days} \times 20,000 = 6,200,000/=$
b) Shaqaalaha Security-ga, Operation-ka & Fire-ka = 19,200,000/=
c) Booliska Madaarka (isbeeso & Shidaal) $150,000 \times 31 \text{ days} = 4,650,000/=$

10) **Kharashka Shaqaalaha Heeganka Mishiinada iyo**
Ilaaliyayaasha 6 qof $\times 31 \text{ days} \times 20,000 = 3,720,000/=$

11) **Kharashka V.I.P-ga ee Weftiyada** = 1,000,000/=

Total:- **76,009,000/=**

Madaarka Berbera:-

1) **Shidaalka Mishiinada aan Miisaniyadda ku jirin:-**

- Mishiinada Madaarka Berbera $100 \text{ ltrs} \times 1 \text{ day} \times 5,500 = 17,050,000/=$
- Dab-demiska Madaarka Berbera $20 \text{ Ltrs} \times 31 \text{ days} \times 5,500 = 3,410,000/=$

2) **Biyaha Madaarka Berbera** $1 \text{ Load Per day} \times 31 \text{ days} \times 300,000 = 9,300,000/=$

3) **Qalabka Nadaafadda Musqulaha** = 1,000,000/=

- 4) Dayactirka Run-way-ga & dhirgoynta Hareerihisa = 1,000,000/=
- 5) Dayactirka Musqulaha & Dhismayaasha Kale = 900,000/=

6) Direyska Shaqaalaha 28qof X2 isku joog = 56Joog X127,600
sannadkii Hal mar 7,145,000 bishii waxay noqonaysaa = 596,000/=

7) Over-time-ka shaqaalaha ee joogtada ah:-

- a) Shaqaalaha xoola-celiyayaasha, Beer-walayaasha
6 qof X31days X20,000 = 3,720,000/=
- b) Shaqaalaha Security-ga, Operation-ka
& Fire-ka 20qof X31days X20,000 = 12,400,000/=
- c) Booliska Madaarka (isbeeso + Shidaal) 100,000 X31days = 3,100,000/=

8) Kharashka V.I.P-ga:- = 300,000/=

Total:- 52,776,000/=

Isugeynta Guud ee kharashka labada Madaar:-

- Kharashka Billaha M/ Hargeys 76,009,000/= \$14.617

- Kharashka Billaha ee M/ Berbera 52,776,000/= \$10.149

Total: - 128,785,000/= \$24.766

Dakhliga Malo'awaalka ee Madaarka Hargeisa \$ 10,500

Dakhliga Malo'awaalka ee Madaarka Berbera \$ 8,500

Total: 19,000

Marka la kala jaro kharashka loo baahanyahay iyo Dakhliga
Malo'awaalka ah waxa kharashkii loo baahnaa dhinmaya
\$ 5,766 Bishiiba.

Allaa-----Mahad-----Gen.



Maxamuud Xaashi Cabdi
WASIIRKA, WDH & C/CIRKA

